SOM **2017**

SHARCIGA QOYSKA EE HAWEENKA KU NOOL ONTARIO

Heshiiska Qoyska ama Lamaanaha

Dhamaan Dumarka oo dhan. Hal sharci oo qoyska ah.
Ogoow xuquuqdaada.

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

Daabacaadda koowaad waxaa daabacay:

CCMW
Canadian Council of Muslim Women
Le conseil canadien des femmes musulmanes

Heshiiska qoyska ama lamaanaha

Buugan yar waxaa loogu talagalay in lagu siiyo faham asaasi ah oo ku saabsan arrimaha la xiriira sharciga. Ma aha beddel ku saabsan talobixin sharciyeed siyo caawimaad shaqsiyadeed. Haddi aad ku howlantahay arimaha sharciga qoyska, waxaa muhiim ah inaad hesho talo sharci ah sida ugu dhakhsaha badan si aad u fahamtid doorashooyinkaaga iyo inaad ilaaliso xuquuqdaada. Wixii macluumad dheerad ah oo ku saabsan sida loo helo iyo loo bixiyo kharashka qareenka xeerka qoyska, ka fiiri buuga yar ee FLEW iyo webinar helitaanka caawin dhibaatada sharciga Qoyska". waxaa sidoo kale jira arimo muhiim ah oo loogu talagalay haweenka muslimka ah, oo aad ka heli doonto bogga internetka ee FLEW. Liis dhameystiran, booqo: http://www.onefamilylaw.ca/en/muslimwomen/.

Macluumaadka waxaa lla diyaariyey iyadoo lala tashanayo haweenka Muslimiinta ah. waxaa loogu talagalay inay dumarka musliminta siiso macluumaad aasaasi ah oo ku saabsan sharciga qoyska ee Onario iyo sida ay u khuseyso bulshooyinka Muslimiinta ah.

Heshiiska qoyska waa heshiisyo u dhaxeeya labo qof oo xiriir qoys ka dhaxeeyo. Waxay dejiyaan xuquuq iyo waajibaad gaar ah oo labada qof ay isku raaceen. Marka heshiisyada qoyska raacaan xeerar gaar ah, waa sharci, waaxa laga yaaba in maxkamad kugu amarto in aad raacdo heshiiska.

Heshiiska Guurka, Heshiiska Wada noolaanshaha iyo **Heshiiska kala noolaanshaha** waa noocyo kala duwan ee Heshiisyadda qoyska. Waxaad u isticmaali kartaa heshiiska qoys in aad ku raacsantahay lamaanahaaga mise wixii ku dhici doona inta lagu jirto xiriirkiina, iyo sidoo kale waxii dhici doona haddi xiriirkiina dhamaado.

Heshiisyada qoyska maaha sharci haddi aysan qoraal ahayn. Adiga iyo lamaanahaagaba waa in aad sexiixdaan heshiiska qof markhaati ah hortiisa. Haddii aad rabtid in aad bedesho wax kasta oo heshiiska ku qoran, ama dooneysid in joojisid heshiiska, waa in u heshiiskaaga cusub ahaada mid qoraal ah, labadiinunna ku hor sexiixdan markhaati hortiisa.

Heshiisyada qoyska waxay kaa qaadi karaan xuquuq muuhiim ah. Waxay kaa qaadi karaan xuquuqdaada hantidaada, iyo sido kale xaqa aad u leedahay taageerada lacageed ee lamaanahaaga ku siinayaan sharci ahaan. **Waxaa marwaliba muhiim ah inaad la hadasho qareen ka hor inta aadan saxiixin heshiiska qoyska.**

Noocyada heshiiska qoyska ama lamaanaha

1. Heshiiska Guurka

Sharciga ontario wuxu dhigaya iin aad adiga iyo xaaskaga/ saygaaga ku **heshiisaan arimaha guurka** ka hor ama ka dib markaad is guursataan. Haddi aad diyaarisaan ka hor intaadan guursan, waxaa la oranayaa "**heshiis horudhac**" **ah.**

Heeshiiska guurka wuxuu oran karaa:

- sida aad rabto in aad u sameeysato waxyaabo ku saabsan xiriirkaada, tusaale ahaan waxaad ku heshiin kartaan arimaha la xiriira lacagta. Idinka oo kala gar ka dhigaayo xisaabta bangiga.
- waxa aad sameyn doonto haddi guurkaaga uu burburo, tusaale ahaan, sida lo kala qaybsanaayo hantida, iyo inta lacag ee masruufka midkiina uu siin doono midka kale.

Waxaad sidoo kale go'aansan kartaan heshiiska guurka gudahiisa in ah ee midkiinna sheegan doonin masruufka haddi aad kala tagtaan ama aad is furtaan. **Heeshiiska Guurka laguma sheegi karo waxyabo ku saabsan haynta iyo helitaanka caruurtaada.** Maxkamaddu ma fulin doonto qeybtaan, haddi ay ku jiraan heshiiska guurka. Xannaaneynta iyo helitaanka caruurta waxa la go'aamin karaa oo keliya marka adiga iyo lamanahaagu aad kala tagtaan.

Heshiiska Guurka iyo *Hanida Qoyska*

Sharciga gobolka Ontario wuxu dhigaya lamanaaha is qaba ee kala tagay iney xaq u leeyihin inay si siman u wadaagaan wixii ku kordha qiimaha hantidooda intii aay isqabeen.

Sharcigu wuxuu dhigayaa xisaabin gaar ah oo lagu ogaanayo waxa lamaane kasta uu xaq u leeyahay inuu helo. tan iwaxa la dhaaha "sinaanta".

Waxaa sidoo kale jira qawaaniin gaar ah oo hoos imanaya sharciyada gobolka Ontario, oo ku saabsan wadaagida qiimaha "guriga qoyska". Kani waa guriga aad adiga iyo saygaaga/ xaaskaaga ku nooledeen qoys ahaan markii aad kala tagteen.

Heshiiska guurka wuxuu idin ogolaanaya adiga iyo lamanahaaga inaad sameysan kartaan qorshe idinka idin gaar ah oo aad ku wadaagtan hantidiina, oo uu ka mid yahay guriga guurka. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiyo inaad saxiixdo heshiiska guuriga oo sheegaya in hadi aad kala tagtaan, qimaha gurigaaga ama hantida kale in aan la wadaageynin. Ama heshiiska guurka wuxuu sheegi karaa in qaybtaada hantida qoyska ay noqon doonto qadar aan ka yara wixii aad xaq u leedahay inaad hesho. Sharciga wuxuu u oggolaanayaa heshiiska guurka inu ku daro arimaha noocaas ah, maxkamadduna way dhaqan gelin kartaa.

Aad uga foojignow inaad ku dartiid gurigaaaga iyo hantida hesshiiska guurka. Waxaad iskaga tagi karta xuquuqdaad dhanka sharciga. Waa muhiim inaad la hadasho qareenka sharciga qoyska sii aad u fahamto xuquuqdaada iyo doorka.

Xuquuqda in aad ku noolaado Guriga Guurka.
Sharcigu wuxuu sidoo kale leeyahay adiga iyo saygaaaga labadiinuba waxaad xaq u leedihiin in aad ku noolaan kartaan guriga guurka, haddi aysan maxkamada go'an ka gaarin ama labadiinu ku heshiin wax ka duwan tas. Micno malaha qof ka uu magaciisu ku qoran yahay guriga. Sharcigu wuxuu oranaaya in lamaanaha aney iibin karin ama ku amaahin karin guriga adigoo ruqsad ka helin qofka kale. **Heshiiska guurka waxba kama bedeli karo xuquuqda ku saabsan Guriga guurka.**

Heshiiska Guurka Islaamka

Heshiiska Guurka Islaamka (marmarka qaarkood loo yaqaan *nikahnameh*, *aqd al-zawá*j ama *aqd*) waxaa loo qaadan karaa heshiis sharci gobolka Ontario, haddi u buuxiyo shuruudahan:

- in uu yahay qoraal;
- inaad sexeexden adiga iyo lamanahaagu idinka oo hor jooga markhaatiyal, iyo
- inay raacaysa shuruudaha ku saabsan waxyabaha lagu dari karo ama lagu dari karn heshiiska Guurka ee gobolka Ontario.

Tani macnaheedu waa heshiiska Guurka islaamka, sida heshiisyadda Guurka ee gobolka Ontario:

- waxay qaadi kartaa xuquuqda lamaanaha ee sharcigu hoos yimaado, si loo wadaago qiimaha hantida qoyska iyo guryaha guurka;
- ma sameyn karo qabanqaabinta haynta iyo helitaanka ilmo haddi guurka dhamaado.

Qayb kasta oo ka hadleysa haynta ilmaha, tusaale ahaan "ababuhu wuxuu heli karaa wiilashiisa marka ay gaaraan 6 sano", looma oggola sida u sharciga gobolka Ontario ku qoran. **Xitaa haddi ay dumarku saxixday heshiiska Guurka Islaamka ah ee sheegaya in ninkeedu uu haynsanayo caruurta, waxaay u tagi karta maxkamada gobolka Ontario. Sii aay u heesho go'aan ka duwan oo ku saabsan helitaanka iyo heynta caruurta.**

Mararka qaar dadku waxay isku guursadaan gobolka Onario, iyaga oo isku guursada sharciga diiniga ah, lakin iyaga oo an raacin dhamaan sharciyada ku saabsan guurka ee u yala gobolka Ontario (fiiri buugga yar ee dumarka muslimiinta *Guurka iyo Furiinka)*. Sidan oo kale, maxkamada ayaa go'aan ka gaari doonto in heshiiska guurka uu ansax yahay, iyadoo

la eegayo duruufaha Guurka. **Haddi aad wax sualo ah ka qabtiid xoojinta heshiiska Guurka islaamka ah, waa muhim inad la xirirto qareen jooga gobolka Ontario.**

Meherka
Guurka islaamka ah, ninku wuxuu balanqaadayaa inuu siiyo xaaskiisa lacag ama hadiyado kale oo qeyb ka ah heshiiska guurka. Heshiiskan marmarka qaarkood waxaa loogu yeeraa *Meher.* Maxkamaduhu waxay aqbaleen *Meherka* sida heshiiska guurka ee saxda ah, marka la raaco xeerarka heshiiska guurka ee gobolka Ontario, oo ay ku jirto cadaalad.

Maxkamaddu waxay tixgelin kartaa *Meherka* marka ay go'aamineeyso xuquuqda lamaanaha ee kusaabsan qaybinta hantida qoyska iyo bixinta masruufka. Maxkamadaha ku yaala gobolka Onario, waxay ula dhaqman *Meherka* si ka duwan hantida kale ee la wadaago ee u dhaxaysa labada isqabta marka ay kala tagaan. tani waxay ka dhigan tahay inaad awood u leedahay inaad hesho *Meherka* iyo sidoo kale xuquuqda kale ee hantida hoos imaada sharciga qoyska ee gobolka Ontario. Haddi aad leedahay *Meher* oo aad ka fekereyso inad kala tagtaan xaaskada, waxa wanagsan inad la tashato qareen aqoon u leh qaynuunka qoyska ee la xiriira *Meherka*.

2. Heshiiska wada-noolaanshaha

Heshiiska wada noolaanshaha waa sida heshiiska guurka, laakiin **waa dadka wada nool iyagoo aan is guursan.** Heshiisyada wada noolaanshaha waxay noqon karaan mid la mid ah heshiisyada guurka. Heshiiska wada noolaanshaha ma sheegi karo wax ku saabsan helitaanka ama heynta caruurta. Maxkamaddu ma fulin doonto qeybtaan, haddi ay ku jiraan heshiiska wada noolaanshaha. arrimahaan waxaa la go'aamin karaa oo kaliya markaad kala tagtaan.

Waxaa muhiim ah in la ogaado **Sharciga qoyska ee gobolka Ontario ee ku saabsan hanti ma guurtada iyo guriga guurka ma khuseeyo lamaanayaasha aan is qabin ee wada nool.** Marka labada qof ee aan is qabin ay kala tagaan, guriga ay ku noolaan jireen waxaa isku leh qofka magaciisu ku qoran yahay sabarloogadda. Haddi aad ku caawisay inaad ilaaliso ama aad bixiso lacagta guriga, waa inaad la hadashaa qareen oo ku saabsan xuquuqda aad leedahay si aad ula wadaagto qiimaha guriga.

Nooc kale oo ah heshiiska guurka ah waxa loogu yeeraa heshiiska guurka ku meelgaarka ah (sida *mutah*, *curfi* ama khudbo *siro*). Haddi adiga iyo laamanahagu aad sameyseen heshiis ka noocan ah, waxaa sido kale laga yaabaa in loo tixgeliyo heshiis wada noolaansho oo hoos imanaya sharciga Ontario. haddi aad ka fekereyso inaad gasho heshiiskan ado jooga Ontario, waa muhiim inaad la hadasho qareen si aad u fahanto sida ay u saamayn karto xuquuqdaada.

3. Heshiiska kala taga ama kala noolaanshaha
Heshiiska kala noolaanshaha waa nooc kamid ah heshiisyada qoyska. Waxaad isticmaali karta heshiis kala noolanshaha, sii aad u go'aansato sida loola tacaalo arrimaha marka adiga iyo saygaaga ama amaanahaagu kala tagtaan. **Waxaad sameyn karta heshiiska kala tagitaanka hadi aad is qabteen ama aad la nooshahay qof aadan si sharci ah ku guursan.**

Heshiiska kala tagitaanka wuxuu kuqotomi karaa arimaha la xiriira sida loo qeybsanaayo hantida qoyska, masruufka qoyska ee lamanaha midba midka kale uu siin doono iyo qorshaha xanaaneynta, helitaanka and ilaalinta caruurta.

Adiga iyo lamaanahaagu waxad dooran kartan inad isticmashaan heshiiska kala tagitaanka si loo xalliyo arrimahan khuseeya sababto ah:

- go'aanka wada xaajoodka wuxuu noqon karaa mid degdeg ah oo ka sahlan marka loo eego aaditaanka maxkamada;
- waxaad xakameyn karta waxa lagu dari karo heshiiskaaga
- waxaa laga yaaba in adiga iyo lamaanahaagu raacdan heshiiskaan, sababtoo ah idinka ayaa doortay oo ogolaaday waxa ku qoran heshiiska.

Heshiiska qoyska iyo Xadgudubka Qoyska

Haddi uu jiro rabshad, xadgudub ama cagajuglayn qoyska gudahiisa, haweentu waa in ay ka foojignaato ku heshiiso, heshiis kasta oo Qoyska ku sabsan.

dumarka waxaa mararka qaarkood lagu cadaadiyaa inay ka taagaan sheegashooyinka taageero dhaqaale ama helitaanka *Meherka* ee heshiiska kala noolaanshaha. Mararka qaarkood haweenka ayaa lagu cadaadiyaa inay iska daayan xuquuqdooda, iyagoo ku badelanaya in caruurtoda aay helaan, ama loo balanqaado in uu ninka fuuri doono haweeyneyda si waafaqsan uriin diinta.

Haddi aaad xaladaan ku jirtiid waxa muhim ah inad la hadashid qareen, oo kusaabsan xaquuqdaada iyo fursadaha kuu furan.

Sida loo Dhaqan-gelin lahaa heshiiska qoyska

Maxkamaddu dib uma eegi doonto heshiiskiina qoyska haddi adiga ama xaaskaaga uusan dood ka keenin. Haddi heshiiska qoyska uu

raaco sharciga gobolka Ontario si loogu aqoonsado sharci, markaa waxaa laga yaaba inuu noqdo heshiis ay maxkamaddu fuliso.

Haddi heshiiskaaga ku jiro heshiis ku saabsan bixinta masruufka qoyska iyo masruufka caruurta, waxaad u gudbin kartaa heshiiska maxkamadda, ka dibna xafiiska mas'uuliyadda qoyska (xafiiska dawladda gobolka Ontario), wuxuu awooda u leeyahay inuu hubiyo in bixina lacagta taageerada la bixiyo.

Haddi aad u malayneyso in heshiiska qoyska uu yahay mid aan cadaalad ahayn, sababtoo ah ma haysid dhammaan arimaha la xiriira dhaqaale ee lamaanahaaga. Lamanaahaga, ama sababtoo ah waxaad dareentay cadaadis, ama haddi ay jirtey xadgudub ama isku dheellitir la'aan xagga awoodda u dhaxaysa adiga iyo xaaskaaga/ lammaanaha, maxkamadda waxaa laga yaabaa inay go'aamiso in heshiiska uusan ansax ahayn. Qareen aya ku caawin kara, si aad uu fahantiid fursadahaga.

Fulinta heshiis ku saabsan dhaqanka ama diinta
Haddi heshiiskaaga qoyska u ku jiro shuruudo la xiriira dhaqanka ama diin, maxkamaddu way dhaqangelin kartaa arimahaa iyadoo la xeerinaayo xaaladda.

Tusaale ahaan, maxkamaddu waxay dhihi kartaa in ninkaagu bixiyo lacagta *Meherka*, haddi ay ku jirto heshiiska qoyska.

Laakin haddi lamaane uu isku dayo in uu diido furuun diimeed si uu u cadaadiyo lamanaaha kale si loo xaliyo arrimaha qoyskooda, waxaa laga yaaba maxkamada in ay diiddo inay caawiso lamanaaha didey furiinta diimeed.

Halka sheey ee aney maxkamad dalka Kanada sameyn karin, waa iney kuqasabto qof in uu xaaska in la siyo furiin diimeed. Lakin maxkamaduu go'aamin kartaa lamanaaha, in uu bixiyo lacag la xiriirta jebitaanka shuruudaha heshiiska qoyska.

Aad uga taxaddar inaad ku heshiiso wax kasta oo kubedelesho ah oo ku saabsan saygaaga/xaaskaga ballanqaadka inu ku siiyo furiin diimeed. Maxkamaddaha dalka Kanada qofna kuma qasbi karan in la siiyo furiin diimeed, xitaa haddii ay ku jirey is afgaradka ama heshiiska qoyska.

Haddi adiga iyo lamanaahagu isku guursateen waddan Muslim ah, waxa laga yaaba in qaar ka mid ah shuruudaha guurka u khilaafo sharciga qoyska ee gobolka Ontario. Waxaa muhiim ah inaad dib u eegto heshiiska, adiga oo la kashanaya qareenka sharciga qoyska, si aad u hubiso inaad fahamsantahay xuquuqdaada iyo fursadahaaga hoos yimaada sharciga Ontario.

Maxkamadduhu miyey beddeli karaan heshiisyo an caddaalad ahayn?

Haddi aad rabtid in aad wax kabedel ama dood kakeentid heshiiska qoyska, waa inaad ka dalbataa maxkamada. Laakin waa muhim in aad ogaato badanaa maxkamaduhu in anaay fargelin heshiisyadaas mana beddeli doonaan, sababtoo ah in ay siinaysa qofka wax ka yar wixii aay ku heli lahayeen sharciga qoyska.

Waxaay u badantahay inaad ku guuleysatid inaad dood kakeentid heshiiskaaga haddi aad muujin kartid:

- lamaanahaaga dacaad kama anay aheyn arimhahooda la xiriira dhaqaalahooda;
- waxaa lagugu cadaadiyey inaad saxiixdo heshiiska;
- ma aadan dareemin inaad beddeli kartid heshiiska sababtoo ah hanjabaad ama cagajug leyn;
- heshiisku waa mid aan cadaalad ahayn.

Maxkamaduhu inta badan waxbo kama bedelaan heshiisyadda ku saabsan kala qaybinta hantida. Waxay u badan tahay inay waxyar kabeddelaan waxa u heshiisku

leeyahay ee ku saabsan lacag bixinta si ay kaaga caawiyaan adiga iyo caruurtaada. Sidoo kale, haddi xaaladaadu ka sii xumaato marka looeego waqtigii heshiiska la saxiixay, waxaa laga yaaba in aay maxkamaddu badasho heshiiska.

Marka heshiiska qoyska dood laga keeno, maxkamaddu aya laga yaaba in ay go'aamiso in qayb ka mid ah heshiiska laga saaro. Haddii qeybtaas ka midka ah heshiiska aay muhiim tahay, waxaa laga yaaba in maxkamaddu wax kama jiraan kasoo qaado dhamaan heshiiska. Haddi aay sidaa dhacdo, adiga iyo lamanahaaga waxaad samayn kartaan heshiis cusub ama, haddi aadan ku heshiin, waxaad weydiisan kartaan maxkamadda idin ka caawiso arimahan.

Marwalba waxaa muhiim ah inaad la hadasho qareen ka hor intaadan saxeexin heshiiska qoyska. Hubi inaad fahmeytid waxa ku qoran heshiiska. Waxaad hubisaa inaad fahamsan tahay sida xuqquuqdaada ku jirta heshiiskaan ay kaga duwan tahay xuquuqdaada sharciga. Qareen ayaa sidoo kale kaa caawin kara haddii aad hayso dhammaan macluumaadka ku saabsan dhaqaalaha lamaanahaaga, si aad u go'aamiso in heshiiskan kugu haboonyahay.

Tusaale ahaan:

Tusaale 1:
Ismael and Amna ayaa kuheshiiyey nikahnameh ka hor inta aanay is guursan. heshiisku wuxu dhigaya in hadi aay iis furan, in Amna aay siin doonto caruurta Ismael. Waxaa taa bedelkeeda uu u balanqaaday in uu raali ka yahay furiin diimeed, bixiyana *Meherka.* Heshiiskoodaas mala la fulin kara?

Jawab:

- Heshiis kasta oo guurka ah oo ka hadlaya arimaha qofka haysanaya ilmaha sharci ahaan loogama fulin

karo gobolka Ontario. Amna waxay Ismail la geli kartaa heshiis kale oola xiriira heynta caruurta marka ay kala tagaan. Hadi aay isku raaci wayan, Amna aya maxkamada weydisan karta in caruurteeda laguso warejiyo. Maxkamada waa iney marwalba eegta waxa uu wanagsan caruurta. Si ay uu go'aamiyaan hannaanka xannaanaynta iyo helitaanka. Tani waaa tijaabo sharci oo ka kooban waxyabo badan.

- Maxkamadu waxay tixgelin doonta in meherku raacsanyahay qawaaniinta heshiiska guurka ee gobolka Ontario, iyo haddii Amna ay heli karto *Meher* iyo waliba hantida kale ee qoyska iyo masruufka.
- Maxkamaddu ma qasbeeyso in Ismael Amna ku furo, furiin dimeed, laakin maxkamaddu maha iney aqbasho dooda Ismael ee ku saabsan furiinka, hadi uu diido in uu Amna ku furo furiin diimeed.
- Waxyabahan oo dhan ayey Amna u baahantahay iney weydiyso qareenka.

Tusaale 2aad:
Mustafa iyo Miriam waxaa aay is qabeen laba sano, hadana way kala tageen. Miriam aabaheed ayaa Mustafa kala xaajoonaya heshiiska kala tagga, waxaanu uu saxiixay gabadhisa Miriam isaga oo ka masuul ah. Heshiiskan wuxuu ka hadlayaa *Meher* iyo furiin diimeed. Maxkamaduhu ma dhihi karaan heshiiskan waa sharci, mana fulin karaan?

Jawaab:
Heshiiskani sharci kama ahan gobolka Ontario, sababtoo ah Mariam iyo Mustafa waa in aay isku raacaan, labadooduna ayna saxiixan heshiiska markhaati hortiisa. Intaa waxaa dheer, haddi Miriam aay sexiixdo heshiiska, waa inay haysaa xog buuxda iyada oo aan dareemin in lagu qasabayo iney sexiixdo.

Waxaa sidoo kale jira macluumaad kale oo loogu talagalay haweenka muslimka ah, oo aad ka heli doonto bogga internetka ee FLEW. liiska dhameystiran waxaad booqata bogga http://www.onefamilylaw.ca/en/muslimwomen/.

Waa dhici kartaa in dhibaatooyin waa weyn la isu geeysto marka uu xidhidhka lamaanaha uu dhamaad ku dhow yahay. Haddi aad kusoo wajahdo halis degdeg ah wac 911. Haddi adiga ama qof aad taqaanid uu khatar ku jiro, booqo bogga FLEW sii aad uga heeshid macluumaad ku saabsan sidi aad u heli lahayd taageero.

Haddi aad tahay qof dumar ah oo faransiiska ku hadla ee kunool gobolka Ontario, waxaad xaq u leedahay inaad hesho adeegyada luqadda Faransiiska ee dacwadaha maxkamadda xeerka qoyska. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, la xiriir qareen, rugta sharciga ee bulshada, ama khadka taageerada Femaide ee 1-877-336-2433, TTY 1-866-860-7082.

waxaad ka heli kartaa macluumaad badan oo ku saabsan sida loo helo adeegyada Faransiiska ee boggeena internetka www.onefamilylaw.ca ama wwwundroitdefamille.ca

Ra’yiga lagu soo bandhigay halkani waa aragtida FLEW mana ka turjumeeyso midka gobolka Ontario.

Iyadoo dhaqaale ahaan ay taageertay uruurka Law Foundation of Ontario, mawduuca daabacaadan ma aha mid ka turjumaysa aragtida uruurkan.

Mawduucyada sharciga qoyska oo ingriiska ku qoran, waa la heli karta*

1. Xallinta khilaafaadka kale iyo sharciga qoyska (SOM 001)
2. Ilaalinta caruurta iyo sharciga Qoyska (SOM 002)
3. Taageerada ilmaha (SOM 003)
4. Xeerka Qoyska iyo midka dambiyadda (SOM 004)
5. Haynta ilmaha iyo Helitaanka (SOM 005)
6. Qandaraasyada gudaha (SOM 006)
7. sharciga heshiisiinta Qoyska (SOM 007)
8. Arrimaha sharciga qoyska ee la xiriira sogalootiga, qaxootiga ah iyo dumarka aan sharciga lahayn (SOM 008)
9. Helitaanka caawimaad la xiriirta dhibaatada sharciga qoyska (SOM 009)
10. Sida hantida loo qaybiyo ee sharciga Qoyska (SOM 010)
11. Guurka iyo Furiinka (SOM 011)
12. Masruufka lamaanaha (SOM 012)

** Buugan yar waxaa uu kakoobanyahay noocyo badan iyo luuqado badan. Fadlan booqo www.onefamilylaw.ca wixii maclumaad dheerad ah. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad dheeri ah bogga internetka si ay kaaga caawiso fahamka xuquuqdaada sharciga qoyska.*

flew Family Law Education for Women
Women's Right to Know

fodf Femmes ontariennes et droit de la famille
Le droit de savoir

The Law Foundation of Ontario

Funded by: / Financé par :
Ontario

Ra'yiga lagu soo bandhigay qalabkani waa aragtida FLEW kamana turjumeeyso aragida maaligaliyaasha barnaamijka.